Dhiganahan koobani waa laba qormo oo la isu geeyay oo Cabdikariim Sh Bashiir uu ka qoray Dulqarnayn iyo Yuug iyo Yamaayuug, isaga oo kaashanaya taariikhda, raadadka iyo nusuusta diiniga ah.

Ogost 22, 2024

# SOO GAABSIYO

| | |
|---|---|
| NNKH | (Naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaadaan) |
| MKH | (Miilaadiga ka hor, dhalashadii Nebi Ciise kahor) |
| M | (Miilaadiga) |
| H | (Hijriga) |
| Jus | ( Juska: volume) |
| b. | (bogga) |

# Tusmo


**1. Hordhac**……………………………………………….…………………………4
**2. Maxaa laga yidhi?.........................................................................................5**
2. 1 Boqorradii Ximyariyiinta……………………………..……………..5
2. 2 Jiin Juwaan………………………………………………………..……6
2. 3 Aliksandarkii Weynaa…………………………………………….…7
**3. Dhab ahaan waa ayo?..................................................................................10**
3. 1 Saayraskii Weynaa…………………………………………,,,…….11
3. 1. 1 Taallada Saayraskii Weynaa…………………………,………12
**4. Naanaysta Dulqarnayn halkay ka timid?..........................................................14**
4. 1 Saayras iyo Yuhuudda………………………………………..…15
4. 2 Baybalka iyo Saayras…………………………………………………16
4. 3 Diintii Saayras……………………………………………………..…17
**5. Socdaalladii Saayras (Dulqarnayn)………………………………………..…18**
5. 1 Socdaalkiisii u horreeyay ee galbeed ……………………………………18
5. 1. 1 Dadkii uu qabsaday siduu ula dhaqmay…………………………..…18
5. 1. 2 Isha Dhooqada leh ………………………………………….…….20
5. 2 Socdaalkiisii labaad ee Bari ……………………………………………22
**6. Yuug iyo Yamaayuug waa ayo?......................................................................22**
6. 1 Socdaalkii saddexaad ee Dulqarnayn……………………………………..22
6. 2 Asalka labada erey ee "Yuug iyo Yamaayuug"………………………...24
6. 3 Yuug iyo Yamaayuug iyo Baybalka………………………………...…..24
6. 4 Qabiilooyinkan Yuug iyo Yamaayuug Saayras Kahor……………………25
6. 5 Dulqarnayn iyo Yuug iyo Yamaayuug……………………………………26
6. 5. 1 Derbiga uu ku xidhay halkee buu ku yaallaa?.....................................27
6. 5. 1. 1 Gidaarka Derbendi…………………………………………….…28
6. 5. 1. 1 Gidaarka Daaryaal……………………………………………..…29
**6. 6 Yuug iyo Yamaayuug Dulqarnayn Kaddib…………………………..…….32**
6. 6. 1 Geeridii Dulqarnayn…………………………………………..…..32
6. 6. 1. 1 Biliqaysiga guulihii Dulqarnayn………………………………..32
6. 6. 1. 2 Sababtii uu u geeryooday…………………………………………33
6. 6. 2 Weerraradii Yuug iyo Yamaayuug ee Shiinaha ………………….……34
6. 6. 3 Yuug iyo Yamaayuug iyo Qarnigii 4aad……………………………………35
6. 6. 4 Yuug iyo Yamaayuug iyo Qarnigii 12aad…………………………………35
6. 6. 4. 1 Duminta teedkii Yuug iyo Yamaayuug……………………………...35
6. 6. 4. 2 Culimada Islaamka iyo Magoolka……………………………………36
**7. Gebagebo…………………………………………………………………….40**

## 1. Hordhac

Guud ahaan shakhsiyadaha Qur'aanka lagu dhex sheegay, Dulqarnayn waa midka ugu qarsoonida iyo muranka badan, culimada muslimiinta iyo taariikhyahannadooduna ay qaarba meel u la kaceen casriyadii hore iyo kuwii dambeba. Sida aayadaha Qur'aanku ay tilmaamayaan, Dulqarnayn waxa uu ahaa nin boqor ah oo wanaagsan, oo naxariis, dulqaad, garsoor iyo caddaaladba ku tilmaaman, oo dhanka Rabbi laga ilhaaminayay, sidoo kalena galay saddex safar oo waaweyn, oo kii koowaad mid galbeed guntii uu ku tegay ahaa, kii labaadna mid uu bari guntii ku tegay oo uu kula kulmay dad reer baadiye ah oo guryo iyo wax ay cadceedda ka hoos galaan aan haysan, iyo ka saddexaad ee u dambeeya oo ahaa mid laba qolo derbi bir ka samaysan oo nuxaas lagu dhalaaliyay uu ku soo kala dhex dhigay. Tilmaamahanina waa inoo muhiim si aynnu u ogaanno cidda dhabta ah ee Dulqarnayn uu yahay, innaga oo kaashaynna taariikhda qoran, raadadka la hayo iyo nusuusta diiniga ah ee kala geddisan, si natiijo cilmiyaysan oo sugan aynnu u gaadhno.

Qaybaha dambe ee qormadana, waxa aynnu waxa ay si faahfaahsan ugu qaadaadhigi doonnaa safarkii saddexaad ee Dulqarnayn, innaga oo xogo cilmiyaysan oo qotodheer kana fog sheekaxariirooyin iyo mala'awaallo iyo khuraafaadyo ka bixin doonna Yuug iyo Yamaayuug iyo waxa ay ahaayeen, halka ay ku noolaayeen, sooyaalkooda, meeshii Dulqarnayn uu ku xidhay iyo soo bixitaankooda intaba.

## 2. Maxaa laga yidhi?

Ugu horrayn, inta aynaan u gelin ra'yiga ugu awoodda badan uguna saxsan ee caddaymaha taariikheed iyo kuwa degeleed (archaeology) ay xoojinayaan, aynnu is la soo eegno wax ka mid ah wixii culimadii hore iyo qaybo ka mid ah kuwii dambe ee mucaasiriinta ahi ay shakhsiyadda Dulqarnayn ka yidhaahdeen, innaga oo mid walba naqdinaynna una bandhigaynna tilmaamahaas kor ku qoran ee Qur'aanku uu sheegay in ay ku rumoobayaan iyo in kale. Dabcanna ma soo qaadan doonno ra'yiyada aadka u liita ee in la milicsado aan u qalmin, in qaldanaantooda la caddeeyana aan u baahnayn, sida ka sheegaya in Dulqarnayn uu malag ahaa, ama in aadame iyo malag ay iska dhaleen, iyo waxa la midka ah ee caqli iyo cilmi iyo taariikh iyo diinba aan shaqo ku lahayn.

### 2. 1 Boqorradii Ximyar

Culimada iyo taariikhyahannadan muslimiinta qaarkood waxa ay ku tageen, in Dulqarnayn uu ahaa mid ka mid ah boqorradii Ximyariyiinta ee Yaman ee Tabaabicada la odhan jiray, waayo iyaga ayaa la bixi jiray naanaysaha ay "ذو" ugu horreyso, bilmetel "Duu Nuwaas : ذو نواس", "Duu Jadan : ذو جدن" iwm, sida Abuu-Rayxaan al-Bayruuni uu buuggiisa Al-Aathaar al-Baaqiya ku xusay, [1] Maqriizina [2] uu buuggiisa Khudadka ku difaacay, Ibnu-Khalduun [3]iyo culimo kalena ay xoojiyeen, qoraaga iyo cilmibaadhaha reer Masar ee Mansuur Cabdulxakiimna uu buuggiisa "Dulqarnayn" ugu janjeedhsaday. Hase yeeshee mad'habkani waa mid taagdaran, waayo taariikhda lagu ma

[1] Abuurayxaan al-Bayruuni (Al Aathaar al-Baaqiyah, b. 45)
[2] Taqiyudiin al-Maqriisi (1364 – 1442 M), waa taariikhyahan reer Masar ah.
[3] Ibnu-Khalduun (1332 – 1406 M), waa taariikhyahan, faylasuuf bulshayaqaan reer Tuniisiya ah, ahaana aasaasihii cilmiga Cilmiga Bulshada (Sociology; علم الاجتماع)

xusin boqor Reer Yamaneed ah oo Bari iyo Galbeedba gaadhay, qolana derbi xadiid ka samaysan ku xidhay.

## 2. 2 Jiin Juwaan




Jiin Juwaan

Qaar kale waxa ay yidhaahdeen, maya ee waa mid ka mid ah boqorradii Shiinaha oo la odhan jiray Jin Juwaan ( 秦始皇; Qin Shihuang)**,** oo ahaa boqor noolaa inii u dhexaysay 259 – 210 MKH, kaas oo dhisay derbiga aadka u weyn ee waqooyiga Shiinaha ku yaalla ee 21, 000 oo km teedsan. Waxaana ra'yigan qaba aadna u difaacay imaamkii weynaa ee Daahir ibnu Caashuur,[4] tafsiirkiisa at-Taxriir wa Tanwiir,[5] hase ahaatee isna waa ku tabardaran, waayo derbigani waxa uu ka samaysan yahay dhagaxyo iyo ciid, halka ka ka Qur'aanku uu sheegay uu ka samaysnaa bir iyo xadiid.

[4] Daahir ibnu Caashuur (1879 – 1973), caalim iyo imaam Reer Tuniisiya ah, oo buuni ku ahaa tafsiirka iyo fiqhiga.
[5] Daahir ibnu Caashuur (At-Taxriir wa Tanwiir, Jus 17, b. 20)

Midda kale, derbiga Qur'aanku sheegay waa mid laba buurood dhexdooda meel ka bannaan lagu awday, kanna laba buurood dhexdood la ma dhigin ee waxa uu isu maraa buuro kala geddisan, dooxooyin , dhulal siman iyo lamadegaanno intaba.

Intaas waxaa dheer, in Jiin Juwaan uu waqtiyadii dambe caan ku ahaa laynta mufakiriinta iyo aqoonyahannada iyo dilka cid kasta oo nidaamkiisa maamul ka hortimaadda, balse imaam Daahir ibnu Caashuur waa uu sigay xaqiiqada shakhsiyadda Dulqarnayn in uu garto, sida dhiganaheennan xaggiisa dambe aynnu ka ogaan doonno.



Derbiga Weyn ee Shiinaha

## 2. 3 Aliksandarkii Weynaa

Qaar kale waxa ay yidhaahdeen, maya ee waa boqorkii Giriigga ahaa ee Aliksandarkii Weynaa (Alexander The Great; الإسكندر الكبير), oo noolaa intii u dhexaysay 356 – 323 MKH. Waxaana ra'yigan qabay

mufasiriin farabadan, sida Fakhridiin ar- Raasi [6], al- Aluusi[7], Ibnu-Kathiir iyo kuwo kale. Waxaana u horreeyay raggii qabay Ibnu-Siina oo kitaabkiisa Shifaha markii uu ku soo hadalqaaday Aristootal sheegay in uu macallin u ahaa Aliksandar oo uu yidhi waa ninka Qur’aanka dhexdiisa lagu xusay ee Dulqarnayn. Hase yeeshee isaguna waa mid tabardaran, waayo tilmaamaha uu Alle Dulqarnayn ku sheegay ee in uu nin wanaagsan oo ilhaam Rabbi ku socday oo mu’mina ahaa kuma rumoobi karaan Aliksandarkan, maxaa yeelay taariikhyahannada oo dhami waxa ay is ku waafaqeen in uu sanamcaabud (وثني) ahaa, isaga iyo macallinkiisii Aristootalba.



Lawxaddan waxaa lagu sawiray Aliksandarkii Weynaa oo ugaadhsanaya, waxaana ay u noqonaysaa 330 MKH.

Dhanka kalena, Aliksandarkii Weynaa ma ahayn nin naxariis iyo caddaalad kula dhaqma degaannada uu qabsado, oo 330 MKH. waxa uuba gubay magaaladii weynayd ee Beersaabolis (Persebolis; برسبوليس) ee uu dhisay Daaraayooskii Koowaad (Darius The Great; داريوس الأول), kaddib markii shacabkii magaalada ku dhaqnaa ay damceen in ay is ka

[6] Fakhrudiin ar-Raasi (1150 – 1210 M ), waa tafsiiryahan. fiqiyaan, caqiidoyaqaan, faylasuuf iyo imaam culuumta caqliga iyo naqliba bad ku ahaa.
[7] Shihaabu-diin al-Aluusi (1854 – 1803), waa tafsiiryahan, xadiisyahan, fiqiyaan iyo suugaanyahan reer Ciraaq ah.

caabbiyaan. Waxa intaa u dheeraa, sida la sheego, in uu isku arki jiray ilaah, buugaagta taariikhda qaarkoodna waxa ay xuseen in xidhiidh jinsi oo saaxiibtinimo dhaafsiisan ay wada lahaayeen saaxiibkiisii iyo janaraalkiisii Hephaestion. Sidoo kale, ninkani weligii ma dhisin derbi xadiid iyo nuxaas ka samaysan oo dabna lagu dhalaaliyay, mana jirto wax tusinaya in magaca "Dulqarnayn" loo yaqaannay, gebi ahaanba. Markaana suurtogal ma aha in uu noqdo Dulqarnaynka Qur'aanka lagu sheegay.

Culimadani, waxa kale oo ay mad'habkoodan ku kabeen war Ibnu-Jariir uu tafsiirkiisa ku soo saaray, oo sheegaya in Nebiga la weyddiiyay cidda Dulqarnayn uu yahay, kaddibna uu yidhi "Roomaan buu ahaa, waxa uuna noqday boqor, kaddibna Masar buu aaday, magaalada Iskandariya ayuuna dhisay", iyaga oo yidhi magaalada Iskandariya waxa taariikhyahannadu ay is ku waafaqeen in uu Aliksandarkii Weynaa dhisay, markaasna Dulqarnayn waa isaga.

Balse waxaa ka hoosbaxday in warkani uu daciif yahay oo aanu Nebiga ka sugnayn, si la mid ah sida ay uga hoosbaxday taariikhda dhabta ah ee Aliksandarkii Weynaa ee mustaxiilka ka dhigaysa in uu Dulqarnaynka Qur'aanku lagu sheegay noqdo. Imaam Ibnu-Xajar al-Casqalaani oo warkaas ka warramayaa waxa uu kitaabkiisa Fatxul-Baariga ku yidhi: "Warkani haddii uu sugnaan lahaa, murankuba halkaas buu ku soo afjarmi lahaa, laakiin waa daciif ". [8] Sidaas si le'egna Xaafid Ibnu-Kathiir ayaa yidhi: "Waxa ku jirta dherer saa'id ah, waana munkar, Nebigana ka muu sugnaan, waxa ugu weyn ee uu noqon karaana waa in uu warar Israa'iiliyaad ah yahay". [9]

---

[8] Ibnu-Xajar al-Casqalaani (Fatxul-Baarii Fii Sharxi Saxiixil Bukhaari, Jus. 6, b. 440)
[9] Abulfidaa ( Tafsiiru Ibnu-Khathiir, Jus. 3, b. 106)

## 3. Dhab ahaan waa ayo?

Qarnigii 20aad horraantiisii, waxaa soo shaacbaxday cilmibaashista imaamkii weynaa ee Hindiga ahaa ee Mawlaanaa Abulkalaam Aazaad. Abulkalaam Aazaad waxa uu ku dhashay Maka al-Mukarrama, dabayaaqadii qarnigii 19aad, 1888. Waxa uu ahaa buuni buugaag badan qoray, oo uu ugu horreeyo tafsiirkiisa Qur'aanka ee luuqadda Urduuga ku qoran, af Ingiriisigana loo soo turjumay, ee "Turjumanul Qur'an". Waxa kale oo uu noqday wasiirkii waxbarasho ee u horreeyay Hindiya madaxbannaanidii kaddib, 1947.



Abulkalam Azad (1888 - 1958)

Mawlaanaa Abulkalaam Aazaad markii uu qorayay tafsiirkiisa, ee uu soo gaadhay suuradda Kahfi, ayaa waxa uu is dul taagay shakhsiyadda Dulqarnayn, iyada oo ay u cuntami weyday wareerka mufasiriinta ee ku aaddan shakhsiyaddan iyo sida aanay u jirin cid war sugan oo caddaymo wata ka keentay. Kaddibna waxa uu galay cilmbibaadhis ballaadhan oo cimrigiisa ka qaadatay 10 sano oo dhammaystiran, oo afaf kala duwan uu darteed u bartay, dhulal badannna uu u maray, isaga oo ku soo idlaaday in Dulqarnayn uu ahaa Saayraskii Weynaa (Cyrus

The Great; قورش الكبير ), aasaasihii boqortooyada Akhminiyiinta ee Faaris (Beershiya).

Abulkalaam Aasaad waxa uu mas'aladan ka qoray xaqiijin dheer oo aad u heersarraysa oo hortii iyo gadaashiiba aan mawdduucan laga qorin mid la mid ah, inta ogaalkayga ah, qayb ka mid ah cilmibaashistana waxa aad ka dhex helaysaa buuggiisa Tafsiirka ee "Turjumaanul Qur'aan", mujalladka saddexaad, nasiibdarro se Carabi loo ma turjumin buugga oo dhammaystiran. Gadaashiina culimo iyo mufakiriin badan baa ka dabaqaatay kuna qancay ra'yigan, oo uu u horreeyo mufakiriii iyo faylasuufkii Baakistaaniga ahaa ee Abuu Aclaa al-Mawduudi, iyo niman kale.

### 3. 1 Saayraskii Weynaa

Saayraskii Weynaa (Cyrus The Great; قورش الكبير ), waxa uu Iiraan koonfur-galbeeddeeda ku dhashay intii u dhexaysay 600 – 590 C.H. Awoowgii waa Akmiinis (Achaemenes; أحيامنيس), waana halka laga keenay magaca boqortooyadiisa loo bixiyay ee Akmiiniyiinta (Achaemenid Empire; المملكة الأخمينية), halka aabbihii uu yahay Kaambisis (Cambyses; كمبوشيا).


Sannadkii 559 MKH, geeridii aabbihii kaddib, ayaa Saayras uu kursiga madaxtinimada koray, waxa uuna is la markiiba si fudud oo aan dhiig ku daadan ku mideeyay Faaris (Beershiya) oo qaybta koonfureed ahayd, iyo Miidiya (Media; ميديا) oo qaybta waqooyi ahayd, sannadkii 550 MKH, kuwaas oo markii hore ahaa laba gobol oo kala madaxbannaan oo mid walba boqor gooni ahi uu ka taliyo, isaga oo ka dhigay boqortooyo keli ah oo xoog badan, taariikhda markii u horreysay. Qur'aanka kariimka ahina waa ka warramaya, ka hor safarradiisii Galbeed iyo Bari, in Dulqarnayn markii hore dhulka la makansiiyay oo gacmaha loo geliyay , oo waa ka Alle yidhi: " إِنَّا مَكَّنَّا لَهُ

فِى ٱلْأَرْضِ; Annagu waxa aannu makansiinnay dhulka", waayo labadaa boqortooyaad in la mideeyaa ma ahayn wax is ka fudud oo si sahlan loo samayn karo, waafajin Rabbi mooyee, markaasna loona sheegay in shay kasta waddadii uu u mari lahaa loo fudaydiyay, maadaama awood maamul oo xooggan lagu galladay.

Aalaabana, marka Qur'aanku uu ereyga "مكنا له الأرض" adeegsado, waa marka awood maamul oo suurtagalnimadeedu adag tahay uu Ilaahay ruux ku gallado, ama siiyo, sida tan Saayras, oo waa kii Nebi Yuusuf markii xabsiga laga soo saaray ee uu judhiiba Masar madax ka noqday Ilaahay yidhi: "وَكَذَٰلِكَ مَكَّنَّا لِيُوسُفَ فِى ٱلْأَرْضِ; sidaas baanu Yuusuf u makansiinnay dhulka", maadaama sida ruux maxbuus ahi uu magaalo Masar oo kale ah uu madax uga noqdaa ay adag tahay, waafajinta Rabbi mooyee.

### 3. 1. 1 Taallada Saayraskii Weynaa

Qarnigii 19aad dabayaaqadiisii, 1879, nasiibwanaag waxa saynisyahannada raadadku ay magaalada Basaargidhay (Pasargadae; باسارغاد), oo ah meel 50 mayl u jirta magaalada qadiimiga ah ee Beersaabolis (Persepolis; برسيبوليس), ay ka heleen taallo dhif iyo naadir ah oo uu ku sawiran yahay Saayraskii Weynaa (Cyrus The Great; قورش الكبير). Basaargidhay waa magaalo taariikhi ah oo noqotay caasimaddii u horreysay ee Boqortooyadii Akhmiiniyiinta, xilligii uu boqorka ahaa Saayras, waana halka uu ku aasan yahay ee qasrigiisiina uu ku yaallay. Waxa ay imika dhacdaa waqooyi-bari magaalada Shiraz ee ku taalla Iiraan, iyada oo u jirta 80 km.



Taallada Saayraskii Weynaa [10]

Taalladan, waxaa lagu tiriyaa taallada qudha ee Beershiyaan leeyahay ee u dhiganta taallooyinkii hore ee Girgiigga, farshaxan ahaan iyo dhammaystirnaan ahaan. Waxaa ka muuqanaya Saayras oo dhardhaqameedkii lagu yaqaannay boqorrada Beershiya xidhan, madaxiisana ay ka muuqdaan laba gees oo waaweyn oo geeso dibi aad mooddo, uuna ka sii koreeyo taaj badanka astaan u ahaa boqorrada reer Beershiya.Taasina waxa ay marag u tahay, boqorkan Saayras in loo yaqaannay Labageesle (ذي القرنين), intii uu noolaa iyo geeridiisa kaddibba, sababtaas aawadeedna markii la damcay in taalladiisa la xardho aan looga illoobin astaantii uu caanka ku ahaa ee labada gees, ee loogu yeelay. Waxaana taalladani ay u noqonaysaa qarnigii lixaad Ciise Hortii, taas oo ka dhigan in la sameeyay xilligii Saayras ama geeridiisa inyar kaddib.

[10] Curzon, George Nathaniel (2018). Persia and the Persian Question, Volume 2



Sawirgacmeed loo ekaysiiyay taallada Saayras



Qabra Saayraskii Weynaaig

## 4. Naanaysta Dulqarnayn halkay ka timid?

Sida taalladiisa ka muuqata, maadaama Saayraskii Weynaa naanaystan 'Labageesle' loo yaqaannay, waxaa habboon in door ah aynnu is dul taagno si aynnu u baadhno sababta naanaystani ay ugu baxday, inta aynaan u gelin faahfaahinta saddexdii safar ee uu galay. Dabcan waxaa jira fardiyaat farabadan oo culimadii hore ay ka bixiyeen sababta naanaystan Dulqarnayn ay ku timid, kuwaas oo badankoodu uu ku dhisan yahay mala'awaallo aan caddaymo taariikheed iyo kuwo raadad toona lahayn, oo iska saadaal-saadaal ah. Qaar waxa ay yidhaahdeen: sababtu waa in uu bari iyo galbeedba gaadhay, qaar maya ee waa in uu

timaha laba qaybood ka dhigi jiray oo uu midba gees ku gunti jiray, qaar kalena maya ee waa in markii la dilayay madaxa geeskiiska lagu dhuftay,  halka qaar kalena ay yidhaahdeen maya ee waa in uu laba gees oo caadi ahba lahaa, kan dambena waa mid aad u liita una taagdaran, waayo in ruux aadame ahi uu geeso yeeshaa waa wax suurtogalnimada ka fog.

Haddaba marka aynnu u dib milicsanno sababu nusuulka ayaadahan, waxaa inoo soo baxaysa sabab aan waxyaabaas oo dhan midkoodna ahayn, dhan kalena caddayn kale oo xoojinaysa in Dulqarnayn uu Saayras ahaa inna siinaysa, waana isla halka Mawlaanaa Abulkalaam Aazaad uu cilmibaadhistiisa ka ambaqaaday.

## 4. 1  Saayras iyo Yuhuudda

Sida aayadaha billowgooda ka muuqata, waxaa Rasuulka wax laga weyddiiyay Dulqarnayn, oo Alle waxa uu yidhi “ وَيَسْئَلُونَكَ; waxa ay ku weyddiinayaan”. Cidda su’aashan Nebiga weyddiisayna, riwaayaad kala duwani waxa ay ku soo arooreen, in ay ahaayeen mushrikiintii Quraysheed oo Yuhuudda inta ay u tageen ka soo qaatay su’aalo ay Rasuulka ku imtixaamaan. Halkaasna waxa aynu ka la soo dhex bixi karnaa, in Dulqarnaynka Qur’aanka lagu sheegay uu xidhiidh la leeyahay Yuhuudda, iyo in ay yaqaanneen, labadaba. Ibnu Abii-Xaatimna waxa uu Suddi ka soo weriyay, in Yuhuuddu ay Nebiga ku tidhi, “Muxammedoow, waxa aad Ibraahiim, Muuse, Ciise [ma aha ciisahani Nebi Ciise] iyo nebiyada aad uga warrantaa waa in annaga (oo ah ehlukitaab: Yuhuud iyo Kiristaan) aad naga maqashay, ee car noo nooga warran nebi Ilaahay aanu Towraadda ku sheegin [naanaystiisan] meel qudha mooyee?” Kaddibna Rasuulku waxa uu weyddiiyay: “Waa ayo?” Waxa ayna yidhaahdeen “Dulqarnayn”. Dabadeed waxa uu yidhi “Weli wax isaga ku saabsan i ma soo gaadhin [la ii ma waxyoon]”.  Markaas baa ay baxeen iyaga oo farfaraxsan oo

in ay guulaysteen is ka dhaadhiciyay, laakiin ma ay gaadhin albaabka ilaa Jibriil uu Nebiga soo gaadhsiiyay aayadahan”. [11]

## 4. 2 Baaybalka iyo Saayras

Haddaba marka aynnu u noqonno Baybalka, sida uu sameeyay Mawlaanaa Abulkalaam Aasaad, waxa Sifriga Daanyaal oo la sheego in qaybtiisa hore la qoray 160 sano ka hor dhalashadii Saayras aynnu ka helaynnaa kelmad ah “יש לו קרניים” [12], oo loogu dhawaaqayo “Luu karnaa’iim”, macnaheeduna uu yahay geesoole ama laba gees leh, “ ذو القرنين”, markaas oo qudha ayaana Baybalka ay kaga soo aroortay kelmaddaasi. Kelmaddanina waxa ay ku jirtay jumlad Daanyaal — oo la sheego in uu nebi ahaa — uu kaga warramayay manaam uu laba jeer arkay, oo uu sheegay in uu ku riyooday wan laba gees leh oo galbeed iyo waqooyi iyo koonfur is ku ballaadhinaya, cid horjoogsatana la waayayo, ilaa mar dambe orgi hal gees lihi uu u imanayo oo uu kaga takhallusayo.

Is la Sifriga Daanyaalna waxaa ku timid, in loo fasiray riyadiisa, oo wanka labada gees leh loogu sheegay in ay yihiin boqorrada Beershiya iyo Miidiya, orgiga kaga takhallusi doonana boqor Giriig ah. Dabcanna sida la wada og yahay, ee taariikhda ku cad, ciddii ugu horreysay ee Beershiya iyo Miidiya midaysay, boqorna u wada noqotay, waxa ay ahayd Saayraskii Weynaa, markaasna wankaas labada gees lihi cidda ugu horreysa ee uu ku rumoobayaa waa isaga. Orgiga marka dambe kaga takhallusayaana waa Aliksandarkii Weynaa, oo 200 oo sano Saayras dabadii yimid, boqortooyadii Akhmiiniyiinta ee uu aasaasayna burburiyay.

[11] Jalaaludiin as-Suyuudi (Ad-Dur al-Manthuur, Jus. 9, b. 630)
[12] Sifru Daanyaal: 8

Marka haddii arrinku sidaas yahay, waxa ay u muuqataa in Saayras markii uu boqorka noqday kaddib uu manaamkan tilmaamaya orgiga labada gees leh maqlay, kuna saamoobay, maadaama boqorradii hore riyooyinka iyo manaamyada ay aad u danayn jireen, naanaystanina ay halkaas ka soo raacday, gaar ahaan markii uu ku duulay Baabil duullaankiisii labaad ee jihada bari oo xagga dambe aynnu kaga warrami doonno, kaas oo uu Yuhuudda kaga xoreeyay guumaysigii Baabbil ee soo bilaabmay markii boqorkii Baabbil ee Nebakidhneesar 2 (Nebuchadnezzar II; نبوخند نصر الثاني) uu ku soo duulay boqortooyadoodiii Yahuuda, 586 MKH, kaddibna inta uu qabsaday degaankoodii ka raray oo uu ku go'doomiyay Baabil ,haykalkii Nebi Sulaymaanna ka burburiyay, ilaa 70-50 sano kaddib uu Saayras yimid oo uu Baabil la wareegay, iyagana uu diintoodii u nabadgeliyay, deegaankoodiina uu ku celiyay.

## 4. 3 Diintii Saayras

Laga soo bilaabo xilligaa Saayras uu Yuhuudda ka xoreeyay gumeysigii Baabbil, xidhiidhka Saayras iyo Yuhuudda u dhexeeyay aad buu u wanaagsanaa, Baaybalka Sifriga Ashciyaana waxaaba ku soo arooray war ah in Saayras uu masiixii Alle doortay yahay, waxaana uu u dhignaa sidan: "Sidaas buu Rabbigu uu ku leeyahay masiixiisa Saayras, oo uu gacanta qabtay [13] si uu ugu jebiyo umaddo dhan." [14]Taasina waxa ay muujinaysaa, in Yuhuuddu ay yaqaanneen kana warqabeen in Saayras muwaxid yahay, heer uu Alle doortayba. Buugaagta taariikhduna waxa ay is kugu wada biyashubteen, in Saayras uu haystay Diinta Saraadushtiyada, [15] oo ku dhisnayd caabudidda

[13] Warkan iyo ka Qur'aanku uu sheegay ee ah in Ilaahay uu Dulqarnayn dhulka makansiiyay, waa kuwo isu dhow oo is waafaqaya.
[14] Sifru Ashciyaa: 45
[15] Saraadushtiyadu( Zoroastrianism: الزرادشتية ) : waa diin qadiimi ah oo ku aasaasantay gacanta Saraadushta (Zarathustra: **زرادشت),** oo sida kutubteeda muqaddaska ahi ay dhigayso ahaa nebi waxyiga ka qaatay Ahura Mazda oo Ilaahay ah.

Ilaaha keliga ah oo ay ugu yeedhi jireen magaca Ahuura-masda ( Ahura Mazda; أهورامازدا), kaas oo macnihiisu yahay "Allaha sarreeya ee abuuraha ah". Waana intii aan la taxriifin diinta Saaraadushtiyada oo carabtu ay u taqaannay Majuusta, Rasuulkana (NNKH) waa ta laga soo weriyay, in uu yidhi: "Sida Ehlukitaabka u la dhaqma", [16] waayo ku ma uu kadsoomin waxyaabihii laga sheegi jiray ee dabcaabudka ahaa, kamana aanay hoos bixin ee waa uu ogaa in ay asal ilaahiya lahayd, si la mid ah Kiristaanka iyo Yuhuudiyada. Sababtaas buuna u yidhi sida Ehlukitaabka u la dhaqma.

## 5. Socdaalladii Saayras (Dulqarnayn)

### 5. 1 Socdaalkiisii u horreeyay ee galbeed

Taariikhyahankii weynaa ee Giriigga ahaa ee Hiiradootas (Herodotus; هيردوتوس), oo lagu naanaysayba "Aabbaha Taariikhda", noolaana intii u dhexaysay 484 – 425 C.H, sida uu buuggiisa Taariikhda (The Histories: التاريخ ) ku soo gudbinayo, markii uu Saayras mideeyay labadii dawladood ee Beershiya iyo Miidiya, ayaa waxa uu damac galay boqorkii Karoowsis (Croesus; كراوسيس) oo xukumi jiray magaaladii loo yaqaannay Liidiya, oo ahayd meel dhacaysay Galbeedka Beershiya, imikana ku taalla gobolka Anaaddool ee Turkiga. Kaddibna Kawroowsis waxa uu dagaal gardarro ah ku soo qaaday Saayras iyo boqortooyadiisii Beershiya, [17]sannadkii 547 MKH, ilaa ugu dambayn dagaal aad u qadhaad oo labada ciidan ku kala dhex maray agagaarka webiga Haaliis (Halys; هاليس) uu Saayras ku jebiyay Karaawsis iyo ciidankiisii 14 maalmood gudahood,[18] sidaasna uu ku qabsaday boqortooyadii Liidiya. Qur'aanka kariimka ahina waa ka

[16] Ibnu Cabdilbarr (Al-Istidkaar, Jus. 8, b. 292)
[17] Herodotus, The Histories (New York : D. Appleton and Co, 1904, p. 29)
[18] Tixraaca hore (p. 34)

sheegaya, in safarkii ugu horreeyay ee Dulqarnayn uu ahaa jihada Galbeed.

**5. 1. 1 Dadkii uu qabsaday siduu ula dhaqmay**

Hiiradootas iyo guud ahaanba taariikhyahannada Giriiggu waxa ay ka maragkaceen, iyaga oo haddana ah cadowgii Saayras maadaama Beershiyaan uu ahaa iyaguna Giriig, in si caddaalad dhaaftay oo naxariisi ay ku dheehan tahay uu Saayras u la dhaqmay shacabkii magaalada Liidiya ku noolaa, intii aan gardarrada iyo dagaalka wadin, ilaa heer in uu dagaal dhacayba aanay dadkii shacabka ahaa dareemin. Karoowsis oo ahaa ninkii duullaanka hoggaaminayayna isna waabu cafiyay, markii dambena lataliye ayuu ka dhigtay, isla sida Hiiradootas tilmaamay. Dhaqankaasina ma ahayn mid madaxdii xilligaas lagu yaqaannay, oo waxaa caado u ahayd marka ay magaalo qabsadaan in ay burburiyaan dadka ku noolna ay xasuuqaan, sidii Aliksandarkii Weynaa uu sameeyay markii uu qabsaday Beersaabolis. Balse Saayras foolxumadaas wuu baalmaray, waxaana uu ku caanbaxay tasaamux diini ah iyo naxariis aan hore loo arag, sida la isku wada waafaqsan yahay.

Waana is la sida Qur’aanku sheegay in uu sameeyay Dulqarnayn duullaankiisii u horreeyay ee dhanka Galbeed ahaa, oo Ilaahay waxa uu kala doorransiiyay in uu u ciqaabo gardarradooda aawadeed, iyo in uu u samafalo (قُلْنَا يَا ذَا الْقَرْنَيْنِ إِمَّا أَن تُعَذِّبَ وَإِمَّا أَن تَتَّخِذَ فِيهِمْ حُسْنًا), isna waxa uu sheegay in ciddiii dulmiga sii wadda uu ciqaabi doono, cidda kalena uu si fiican u la dhaqmi doono, wanaag iyo saamaxaadna uu ka abaal marin doono.

## 5. 1. 2 Isha Dhooqada leh




Gacanka Ismiir

Sida la wada og yahay, jasiirad-u-eekaha Anaaddool oo ah halka uu Saayras dagaalkan ku qabsaday, dhanka u shisheeya ee galbeed waxaa kaga teedsan badda Eejans (Aegean Sea; بحر إيجه) oo gacanno badan ay ka soo faruurmaan, oo uu ka mid yahay gacanka Ismiir (Gulf of İzmir; خليج إزمير). Haddaba gacankaas Ismiir, waxaa dhanka bari iyo dhanka galbeedba kaga teedsan buuro aad u waaweyn oo jiq ah, kuwaas oo marka korka ama meel fog laga soo eego gacanka u sameeya muuqaal qaab il oo kale leh, sida sawirka sare ka muuqata, waana sababta uu Qur'aanku u sheegay in Dulqarnayn uu arkay cadceeddii oo ku sii dhacaysa ishaas "وَجَدَهَا تَغْرُبُ فِي عَيْنٍ", maadaama galbeed meeshii ugu shishaysay ee uu gaadhi kari lahaa gaadhay oo baddu ay soo celisay.

Mana odhan Qur'aanku "وَهِي; iyada oo", ee waxa uu yidhi "وجدها; waxa uu arkay", macnihii isaga ayaa ay sidaa u la muuqatay cadceeddu ama u arkayay, ee ma aha in ay jirto meel gaar ah oo il oo kale ah oo cadceeddu ay dhex gasho marka ay dadka ka qarsoonto. Is la Qur'aanka kariimka ah baana habufikirka noocaas ah ee aadka u liita beeninaya, oo Ilaahay waxa uu suuradda Macaarij ku yidhi: " فلا أقسم برب المشارق والمغارب; waxa aan ku dhaartay Rabbiga cadceed-soo-baxyada iyo

cadceed-dhacyada”, mana odhan “فَلا أقسم برب المشرق والمغرب”, waayo cadceeddu meel keli ah oo ay ku dhacdaa ma jirto ee cidhif kasta oo ay ku qarsoonto waxaa la odhan karaa waa cadceed-dhac, sababtaas baana wadar looga dhigay maadaama ay tiro badnaanayaan meelaha ay ka dhacdaa, maantana waxa laga hadlayaa uu kaas yahay. Waana wax caadi ah oo la wada adeegsado in la yidhaahdo ‘cadceedu halkaas bay ka dhacday’ iyo ‘halkaas bay ka soo baxday’.

Aayadaha kale ee ereyada “المشرق” iyo “المغرب” iyaga oo keli ah ay ku soo arooreenna bari iyo galbeed baa looga jeedaa, bari iyo galbeedna dabcan waa keli, sababtaas baana iyana keli looga dhigay; halka aayadda “رب المشرقين ورب المغربين” ay culimo badan yidhaahdeen waxaa looga jeedaa halka cadceeddu ay ka soo baxdo iyo halka dayaxu uu ka soo baxo, iyo halka cadceeddu ay u dhacdo iyo halka dayaxu uu u dhaco, sababtaas baana laba looga dhigay oo “المشرقين” iyo “المغربين” loo yidhi.

Dhan kale, gacanka Ismiir waxa ku soo shubma webiga Gediz kaas oo xaddiyo aad u farabadan oo dhooqo iyo ciid folkaano ka soo qaada dhaadhacyada hoose ee Anaaddool, gacankana ku soo dara, gaar ahaan waqtiyadii hore, ilaa biyaha gacankuba ay isu beddelaan dhooqo liiq ah. Waana sababta Qur’aanku uu u yidhi “عَيْنٍ حَمِئَةٍ; il aad u dhooqaysan”.



Webiga Gediz

## 5 . 2 Socdaalkiisii labaad ee Bari

Haddana, waxa uu Saayras galay — sida Hiiradootas uu sheegay [19]— socdaalkiisii labaad, oo uu ku tegay bari guntii, sannadkii 545 - 546 MKH, kaas oo uu ku gaadhay Baabbil (Babylon; بابل), oo magaalooyinkii ugu waaweynaa uguna difaaca adkaa ee xilligaas ka mid ahayd, sida isla Hiiradootas tibaaxay [20]. Waxaana xilligaas magaalada xukumi jiray nin la odhan jiray Nabonidus oo ahaa keligiitaliye ay shacabku necbaayeen, ilaa ugu dambayn uu Saayras magaalada furtay sannadkii 539 MKH, Yuhuuddana uu ka xoreeyay gumeysigii iyo qafaalashadii Baabbil (الأسرى البابلي) ee xilligaa lagu hayay oo 50 – 70 sano soo jiitamayay. Qur'aankuna waa ka ka warramaya, in safarkii labaad ee Dulqarnayn uu ahaa mid jihada bari

[19] Herodotus, The Histories (New York : D. Appleton and Co, 1904, p. 69)
[20] Ibid (isla tixraaca hore)

ama cadceed-soo-bax (مطلع الشمس) uu ku tegay, uuna ku la kulmay reer aan haysan dallaayado iyo wax ay cadceedda ka hoosgalaan ama is kaga dhigaan, dabcanna sida muuqata waa shucuubtii reerguuraaga ahayd ee degganayd degaannadii u dhexeeyay Baabbil iyo Faaris.

# 6. Yuug iyo Yamaayuug waa ayo?


## 6. 1 Socdaalkii saddexaad ee Dulqarnayn

Isla taariikhyahankii Giriigga ahaa ee Hiiradootas waxa uu buuggiisa Taariikhda ku sheegay, in Saayraskii Weynaa uu u jihaystay jihada waqooyi kaddib markii uu furtay Baabbil, si uu uga hortago qabiilo la dhihi jiray Maasaajiitaay (Massagetae; الماساجيتاي) oo amniga dawladda iyo degaankaba khatar ku ahayd. [21] Inyar ka horna waxa uu ku sheegayaa, in Saayras uu guulo waaweyn ka gaadhay gobollada sare oo uu uga jeedo waqooyiga, balse aanu isagu dhacdooyinkaas sheegistooda ku sii dheeraan doonin.[22]

Boqortooyadii Beershiya ee Saayras uu boqorka u ahaana, xilligaas waxaa jihada sare ee waqooyi ka xigay dhulka loo yaqaanno Banka Uraasiya (Eurasian Steppe; السهوب الأراسية) ee aadka u ballaadhan, kaas oo jihada bari ka soo bilaabma waqooyi-bari Shiinaha iyo Mangooliya, dhanka galbeedna ku dhammaada Yukrayn iyo dawladda Hangari. Sida la wada og yahayna, dhulkani waxa uu degaan u ahaa qabiilooyin laayaan ah oo muddo markii la joogaba inta ay is urursadaan ku soo duuli jiray dawladaha la jaarka ah, waana kuwa lagu magacaabay Yuug iyo Yamaayuug oo afka Giriiggana loogu yeedho “Gog” iyo “Magog”.

---

[21] Heradotus (The Histories, b. 78)
[22] Isla tixraaca hore




Banka Uraasiya (inta khadka cagaaran uu saaran yahay)

### 6. 2 Asalka labada erey ee “Yuug iyo Yamaayuug”

Labadan erey ee Yuug iyo Yamaayuug “يأجوج ومأجوج”, asal ahaan halka ay ka soo jeedaan waa la isku maandhaafay, qolo walibana dhan bay u la kaceen, oo qaar baa yidhi waxa uu ka yimid ereyga Carbeed ee “المأج” oo macnihiisu yahay “is garaac/ isbaraanbar”, ama “أج النار” oo macnaheedu yahay dabkii baa huray, balse sida saxda ahi waa in aanay ahayn Af Carabi. Af Cibriga waxaa lagu dhahaa ” גּוֹג וּמָגוֹג” oo loogu dhowaaqayo “Gog Magog”, balse la ma hubo asalka ereyga iyo halka uu ka soo jeedo.

### 6. 3 Yuug iyo Yamaayuug iyo Baybalka

Kolka Baybalka aynnu dib ugu noqonno, waxa aynnu arkaynnaa in labadan erey ay ku soo arooreen Sifriga Xisqiyaal, iyada oo Yuug looga jeedo nin boqor ah, Yamaayuugna dhulka uu ka taliyo. Waxaana ay ka

mid ahaayeen hadal ah: “Ina Aadamoow, u jihayso Yuug, dhulka Yamaayuug, boqorka Maashik iyo Tuubbaal”. [23] Maashik (Meshech; ماشك) waxaa loo yaqaannay dad degganaan jiray goobaha ka ag dhow Badda Madow gaar ahaan waqooyiga buuraha Qawqaas (Caucasus Mountains; جبال القوقاز), qaarna waxa ay yidhaahdeen maya ee waxaa looga jeedaa Moosko caasimadda Ruushka ee hadda; halka Tuubbaal (Tubal: توبال) looga jeedo shucuub iyo qabiilooyin degganaa buuraha Qawqaas agtooda, ama waqooyi-bari Anaaddool. Laba goorana waxa ay si wacan u tilmaamayaan goobtii ay degganaayeen qabiilooyinkani oo Bankii Uraasiya ahaa.

### 6. 4 Qabiilooyinkan Yuug iyo Yamaayuug Saayras Kahor

Saayras intii aanu iman, qarnigii 7aad ee miilaadiga hortii, waxaa qabiilooyinkan banka Uraasiya degganaa u afdheeraa mid loo yaqaannay Sikiisiyiin ( Scythians; السكيثيون), oo deegaan ku ahaa waqooyiga Badda Madow (Black Sea; البحر الأسود). Waxaana ay weerar ba’an ku ekeeyeen gobolka Anaaddool ee Turkiga dhaca; halka sannadkii 620 MKH inta ay urursadeen ay weerar kale ku qaadeen boqortooyadii Aashuuriyiinta ( Assyrians; الآشوريين) ee caasimaddeedu ahayd Ninevah, iyaga oo dabcan soo maraya buuraha Qawqaaas, ilaa ugu dambayn ay kaga takhalluseen oo ay rideen boqortooyadaas iyaga oo xulafaysanaya boqortooyadii kale ee Baabbil iyo Miidiya. Tanina waxa ay keentay, in qabiilooyinkani ay cabsi iyo argagax weyn ku abuuraaan dadkii ku noolaa Eeshiya iyo Yurub, ilaa sheekoxariirooyin badan oo aan sal iyo raad lahayn laga faafiyay, oo ay ka mid tahay in aanay ahaynba aadame ee meelo kale ay ka soo jeedaan, ama abuurta aadamaha aanay lahayn. Wax alliyo wax ka jiraana ma jiraan, ee waxa ay ahaayeen uun inna la mid ah oo ilma Nebi Aadan ah.

[23] Sifru-Xisqiyaal: 38

Annaga laftayada ayaa waayadii hore "Amxaar" marka aannu maqalno ay noo sawirmi jirtay dad aad u san waaweyn ama foolfoolxun oo abuur silloon, balse markii aannu aragnay ogaannay in sawirkii aannu ka haysannay aanu sax ahayn, oo dad is ka caadi ah oo bani'aadanka kale u eeg ay yihiin. Waana xaalad is ka jirta tani.

## 6. 5 Dulqarnayn iyo Yuug iyo Yamaayuug




Iyada oo ay sidaas xaaladdu tahay, ayaa qarnigii lixaad ee miilaadiga hortii uu soo baxay Saayraskii Weynaa. Kaddibna waxa uu u jihaystay sida aynnu soo sheegnay jihada waqooyi, isaga oo gaadhay Aasiyada Dhexe meesha hadda loo yaqaanno Labada Badood Dhexdooda, oo looga jeedo Badda Madow (Black Sea; البحر الأسود ) iyo Madda Kasbiyaan (Caspian sea; بحر قزوين). [*eeg khariidadda sare*]. Ilaa imikana, waxaa degaankaas ku yaalla webi la dhaho Saayras (Cyrus river; نهر قورش), oo casriyadii u dambeeyay loo bixiyay Kura [*Mar labaad eeg khariidadda, meesha khadka liimiga ahi uu ku qoran yahay]*, laakiin magaciisii hore ee loo yaqaannay uu ahaa Webiga Saayras (Cyrus river; نهر قورش) sida taariikhayahannada oo dhami ay is ku waafaqeen. Taasina waxa ay maragmadoon u tahay in Saayras uu

halkaas gaadhay is kuna fidiyay, ilaa heer webigii meeshaas ku yaallayba loogu magacdaray. Webigaasna waxa uu uga sii gudbay webiga kale ee Araxes (أراكسس) oo waxoogay yar dhanka waqooyi ka xiga kan Kura, derisna la ah. [24]

### 6. 5. 1 Derbiga uu ku xidhay halkee buu ku yaallaa?

Haddaba halkaas labada badood dhexdooda marka aynnu joogno, waxa aynnu jihada waqooyi ka arkaynnaa Buuraha Qawqaas ee Waaweyn (Greater Caucasus Muntains; جبال القوقاز الكبرى), oo dhaca labada badood dhexdooda. Waa silsiladbuureed aad u ballaadhan oo iskeed u samaynaya xad dabiici ah oo kala saaraya waqooyiga iyo koonfurta, qabiilooyinkii waqoogiga ee weerarka ahaa ee Banka Uraasiya ka soo duuli jiray ee Yuug iyo Yamaayuug loo bixiyayna ka xijaabaya kuwa koonfurta ee dhanka Joorjiya soo xiga.




Buuraha Qawqaas ee Waaweyn (Greater Caucasus mountains; جبال القوقاز) [Waa meesha midabka casaanka ahi uu saaran yahay ee kore ee magaca Greater Caucasus ku qoran yahay]

[24] Jacob Abbott (The Story of Cyrus the Great, p. 274)

Xilligaasna, waxaa koonfurta silsilad-buureeddan degganaa bulshooyin ay ka mid ahaayeen Armanku (Armenians; الأرمينيين), oo ahaa kuwo ku faradhaadheer farsamada noocyadeeda kala duwan, gaar ahaan samaynta agabyada macdanta laga sameeyo iyo dhulbeerashada, waana is la kuwa Dulqarnayn ka codsaday in uu derbi kaga xidho Yuug iyo Yamaayuug. Luuqaddooduna wax ay ahayd luuqadda Armanka, oo ahayd luuqad ay adag tahay in ay Beershiyaanku fahmaan turjumaanno la'aantood, waana ka Qur'aanku uu sheegay in Dulqarnayn uu halkaas kula kulmay duul aan sigaynnin in ay hadalka lagu la hadlayo fahmaan (لَّا يَكَادُونَ يَفْقَهُونَ قَوْلًا), qiraa'o kalena waxa ay ahayd "يُفْقِهُونَ" oo Y-du ay godan tahay, macnaheeduna waxa uu noqonayaa markaas "Kuwo aan sigaynnin in ay hadalka fahansiiyaan cidda ay la hadlayaan ee ay wax ka codsanayaan", waana Saayras (Dulqarnayn) oo Beershiyaan ahaaye.

## 6. 5. 1. 1 Gidaarka Derbendi

Mawlaanaa Abulkalaam Aasaad sida uu ku xusay cilmibaadhistiisa tobanka sano ka qaadatay, ee mawdduucan Dulqarnayn uu ka qoray, silsilad-buureeddan Qawqaas markii booqday waxa uu soo arkay gidaar la dhaho Gidaarka Derbendi (Derbent wall; جدار دربند), sidoo kalena caalamka Islaamka dhexdiisa magacyo kale oo Baabul-abwaab iyo Saddul-khasar ay ka mid yihiin looga yaqaannay, oo silsilad-buureedda dhexdeeda marin ka bannaanaa lagu awday, kaas oo culimadii Islaamka ee hore iyo juquraafiyaqaannadooda qaybo badan oo ka mid ahi ay ku tageen in uu kii Dulqarnayn yahay, sida Baydaawi [25], Mascuudi, Qaswiini [26], Maqdisi [27] iyo Raasi iyo kuwo kaleba. Balse sidaas oo ay tahay darbigan tilmaamihii Qur'aanku ku sheegay ku ma rumoobayaan, waayo sida la og yahay waxa uu ka samaysan yahay

[25] Naasiru-diin al-Baydaawi ( geeryooday 1319 M), waa tafsiiryahan, fiqiyaqaan, xadiisyahan iyo laahuuti Shaafici ah.
[26] Sakariyaa al-Qaswiini (geeryooday 1283 M), waa juquraafiyahan iyo saynisyahan reer Xijaaz ah.
[27] Shamsudiin al-Maqdisi (geeryooday 990 M), waa juquraafiyahan reer Falasdiin ah.

dhoobo iyo dhagaxaan halka ka Qur'aanku sheegay uu leeyahay xadiid iyo nuxaas. Sida muuqata ee loo badinayana, waxaa gidaarkaas Derbendi dhisay boqorkii Saasaaniga ahaa ee Khosrow I, oo noolaa intii u dhexaysay 527 – 578 miilaadiga.



Gidaarka Derbendi (Derbent wall; جدار دربند)

## 6. 5. 1. 1 Gidaarka Daaryaal

Abulkalaam Aasaad halkaa kaga ma hadhin ee waxa uu dib u sii raacay silsiladbuureedda, kaddibna meel kale oo waxoogay yar ka durugsan waxa uu ka helay surin cidhiidhyoon oo lagu magacaabo Surinka Daaryaal (Darial Gorge; مضيق داريال), kaas oo dhaca waqooyiga Joorjiya, ahna surin meel istaraajiiti ah ku yaalla oo labada dhanba silsilad-buureedda Qawqaas ay ka xigto, qabiilooyinka waqooyiga ku noolna marka ay ku soo duulayaan kuwa koonfurta u ahaa marin istaariijiiti ah oo ay uga soo gudbaan.






Surinka Daaryaal (Darial Gorge; مضيق داريال)

Nasiibwanaagna, Mawlaanaa Abulkalaam Aasaad waxa uu surinkan ka dhex helay derbi qadiimi ah oo dhammaanba tilmaamihii Qur'aanku uu ku sheegay derbigii Dulqarnayn ay ku rumoobayaan, oo gobollo xadiid iyo nuxaas ah leh , dhacana laba buurood dhexdooda (بين السدين). Waxaana xusid mudan, in dadka degaankan deggan iyo taariikhyahannaduba ay gidaarkan ama teedkan u yaqaanneen caanna uu ku ahaa Gidaarka Birta ah (Iron Gate; الباب الحديدي), maaddaaama beryihii hore uu ahaa teed weyn oo aad u dheer oo figta labada buurood ku dhowaa surinkana wada awdaya, oo albaab surinka xidhaya uu ahaa, bir iyo nuxaasna ka samaysnaan jiray sida magacaba ku cad, looguna

talogalay in uu ka difaaco dadka koonfurta qabiilooyinka waqooyiga ee wuxuushta ah oo ah kuwa loo bixiyay Yuug iyo Yamaayuug. Turkiduna waxa ay u la baxeen gidaarkan "Damirkapu", oo isna ah erey macinihiisu yahay "Gidaarka birta ah".



*Teedka Daaryaal (Darial wall; جدار داريال), 1876 -1920.* [28]

[28] https://nl.m.wikipedia.org/wiki/Bestand:Darial_Gorge_(1876-1920).jpg

# 6. 6 Yuug iyo Yamaayuug Dulqarnayn Kaddib

## 6. 6. 1 Geeridii Dulqarnayn

Geeridii Saayras ( Alle ha ka raalli-noqdee ) kaddib, in muddo ah baa laga nastay weerarradii qabiilooyinkii Banka Uraasiya degganaa ay Eeshiyada galbeed iyo degaannadii la jaarka ahaaba ku soo qaadi jireen, maaddaama waddadii istaraatiijiga ahayd ee ay u soo mari jireen laga xidhay. Waana la is ku khilaafay sababta ka dambaysay geerida boqorka, sida Hiiradootas uu sheegayo, waayo taariikhdii iyo ilbaxnimadii Saayras iyo Beershiyaba waxa ay ku burburtay gacanta Aliksandarkii Weynaa (Alexander The Great; الإسكندر الكبير), waxa inaga soo gaagaadhay sooyaalkiisuna keliya waa intii taariikhyahannada Giriiggu ay inoo soo gudbiyeen, Giriigga iyo Beershiyana cadow bay ahaayeen sida la wada og yahay, markaasna in ay taariikhdiisa oo dhammaystiran inoo soo gudbiyaan waa mid aan la sugayn.

### 6. 6. 1. 1 Biliqaysiga guulihii Dulqarnayn

Taasina waxa ay keentay, in wax badan oo guulihii Saayras ka mid ahaa loo tiiriyo niman kale, oo badanka Giriig ah. Tusaale ahaan, saddexdan safar ee Saayras waxaa iyaga oo sidooda ah Aliksandarkii Weynaa u tiiriyay nin loo bixiyay Kalastiinaska Beenta ah (Pseudo-Callisthenes; سودو-كاليستينس), kaas oo xaday magaca taariikhyahankii dhabta ahaa ee Aliksandar ee Kalastiinas ( Callisthenes;كاليستينس) , oo inta uu magiciisii saxda ahaa qariyay qoray buug uu ku magacaabay "Alexander Romance; رومانسيات الإسكندر" , kadibna magacii Kalastiinas jeldiga kaga qoray si uu dadka u moodsiiyo in Kalastiinas uu qoray. Waxaana uu buuggan ka buuxiyay dhacdooyin iyo taariikho aan ka sugnayn Aliksandarkii Weynaa, oo ay ka mid yihiin saddexdan safar ee Saayras ee taariikhdu ay inoo kaydisay in Saayras uu lahaa. Buugganna waxaa Carabiyada loo soo turjumay casrigii

Cabbaasiyiinta, intaa kahorna gebi ahaanba ma ahayn mid afkaas ku turjuman.

Taariikhyahankii Yuhuudiga ah ee noolaa qarnigii koowaad ee miilaadiga, Josephus Flavius, isna waxa uu sheegay, in Aliksandarkii Weynaa degaannadaas buuraha Qawqaas uu ka dhisay gidaar, oo sida muuqata uu ka wado gidaarka Daaryaal, waayo gidaarka kale ee Derbent waxaa la dhisay isaga (taariikhyahanka) dabadii sida aynnu soo sheegnay oo suurtogal ma aha in uu kaas ka wado, iyada oo haddaa taariikhda Aliksandar oo si fiican inoo soo wada gaadhay aanay ku sugnayn wax tusinaya in uu gebi ahaanba buurahaa Qawqaas gaadhay, balse cidda gaadhay ay tahay Saayras markaasna cidda gidaarkaas dhistay ay isaga uun noqonayso.

### 6. 6. 1. 2 Sababtii uu u geeryooday

Hiiradootas waxa uu sheegay, in Saayras uu ku geeryooday dagaal uu la galay qabiilooyin loo yaqaannay Maasaajiitaay (Massagetae; المساجيتاي) oo ka mid ah qabiilooyinkan degganaa Banka Uraasiya, dadka qaarna ay sheegtaan in xidhiidh abtirsiino ay la lahaayeen Sikiisiyiinta, sida Hiiradootas xusay,[29] kaddib dagaal ku kala dhex maray sida la aamminsan tahay webiga Seer-Daarya (Syr Drya), oo marka surinka Daaryaal la joogo waqooyi-bari fog looga kacayo. Markaasna, waxa ay u badan tahay, in dagaalku uu ahaa kaddib markii uu Saayras surinka Daaryaal soo xidhay, oo isaga oo halkaas ku sii wajahan markii reerihii degganaa surinka agtiisa uu sii ag marayay ay ka codsadeen in uu ka awdo qabiilooyinkan Sikiisiyiinta ama Yuug iyo Yamaayuug, kaddibna markii uu ka awday uu socdaalkiisii sii watay ilaa uu Maasaajitaayga gaadhay, dagaalna uu kala dhex maray, isla dagaalkaas uu ku geeryooday; halka taariikhyahanno kalena ay qabaan

[29] Herodotus, The Histories (New York : D. Appleton and Co, 1904, p. 78)

in uu dagaalkaas ku soo dhaawacmay oo qasrigiisii markii uu ku soo noqday uu geeryooday.

### 6. 6. 2 Weerraradii Yuug iyo Yamaayuug ee Shiinaha

Sida aynnu dhowaan soo sheegnay ,Saayras dabadii In muddo ah oo aad u badan baa laga nastay weerarradii qabiilooyinkan, kaddibna qarnigii saddexaad ee miilaadiga hortii ayaa qayb iyaga ka mid ahi ay dhankaas iyo Shiinaha is ku shubeen oo ay weerareen maaddaama koonfurta aanay u soo kici karin oo surinkii ay u soo mari jireen ee Daaryaal uu Saayras awday. Taariikhyahannada Shiinuhuna waxa ay qabiilooyinkan u bixiyeen “匈奴”, oo Af Ingiriisi ku noqonaysa Xiongnu, Carabigana loo soo gaabsado “هن”, waxana ay ka mid ahaayeen is la qabiilooyinkii degganaa Banka Uraasiya ee Yuug iyo Yamaayuug. Xilligan waxaa Shiinaha boqor ka ahaa Jiin Juwaan (Qin Shi Huang) oo qaybtii hore aynnu ku soo carrabaabnay, waxa uuna waqtigaas dhisay derbiga Weyn ee waqooyiga Shiinaha dhaca si looga difaaco weerrarada qabiilooyinkan, lagana yaabaa in khiddadda noocan ah uu ka eegtay Saayraski Weynaa.

Tanina waa sababta ka dambaysay, in imaamkii weynaa ee Daahir ibnu Caashuur uu ku tago in in Jiin Juwaan uu ahaa Dulqarnaynka Qur’aanka lagu sheegay, maaddaama derbigan uu qabiilooyinkan Yuug iyo Yamaayuug loo yaqaannay is kaga xidhay, iyada oo haddaa derbiga Shiinuhu uu ciid iyo dhagaxaan ka samaysan yahay. Keliya haddii imaamku uu taariikhda in yar hore ugu noqon lahaana, is la markaaba waxa uu ogaan lahaa in Dulqarnayn uu ahaa Saayraskii Weynaa oo waxoogay saddex qarni ku dhowaad ka horreeyay Jiin Juwaan.

## 6. 6. 3 Yuug iyo Yamaayuug iyo Qarnigii 4aad

Haddana qarnigii afaraad ee miilaadiga, ayaa qabiilooyinkani ay is urursadeen,  waxa ayna weerar ba'an ku eekeeyeen Boqortooyadii Roomaanka ee Galbeed iyaga oo uu hoggaaminayo nin la odhan jiray Attila The Hun, ilaa ay gacantooda ku burburtay bishii Sibteembar sannadkii 476 ee miilaadiga.

## 6. 6. 4 Yuug iyo Yamaayuug iyo Qarnigii 12aad

Intaas kaddib, qarnigii 12aad ee miilaadiga ayaa markii ugu dambaysay qabiilooyinkani iyaga oo aad u tirobadan ay is ku urursadeen dhulkii loo yaqaannay Mangooliya, oo bankii Uraasiya ee ay degganaayeen ka mid ahaa. Waxaana xilligan hoggaaminay ninkii la odhan jiray Jinkiis Khaan. Ereygan "Mangol" laftiisa sida tixraacyada Shiinuhu ay qorayaan, waxa uu ka yimid "Mangog", sida muuqatana isbeddel baa ku dhacay ilaa uu afka Cibriga ku noqday Maagoog, oo ah ereygii loo yaqaannay qabiilooyinkii degganaa banka Uraasiya ee Magoolkanina ay ka soo jeedaan. Kaddibna waxa ay u soo jihaysteen dhankaas iyo Baqdaad iyaga oo soo jiidhay derbigii Daaryaal ee uu dhisay Saayraskii Weynaa (Dulqarnayn), ilaa ay burburiyeen dhammaanba ilbaxnimadii muslimiinta iyo tii carbeed, Baqdaadna ay ku laayeen hal maalin oo qudha wax u dhexeeya 150, 000 ilaa 200, 000 oo qof.

### 6. 6. 4. 1 Duminta teedkii Yuug iyo Yamaayuug

Derbiga ama teedkan Dulqarnayn ee Daaryaal daloolintiisuna waxa ay soo bilaabantay waqtiyo hore, oo waa kii Rasuulku (NNKH) uu ku yidhi xadiiskii ay Bukhaari iyo Muslinba keligii ku soo saareen baabka Ya'juuj wa Ma'juuj : " Carabi waa ay hoogtay, shar baana u soo dhowaaday. Teedkii Yuug iyo Yamaayuug waxa maanta la furay intaa

in le'eg ( suulka iyo farta ku xigta ee Murdisada la dhaho ayuu is ku qabtay)." [30]

Dhab ahaanna, dhowr qarni kaddibba sharkii Rasuulku uu sii sheegay ayaa Carab ku habsaday, kumanyaal haddii aanay ahayn malaayiin qof ayaana ay xasuuqeen Magoolka oo ka mid ahaa qabiilooyinkii banka Uraasiya degganaa ee Yuug iyo Yamaayuug, ilaa imbiraaddooriyaddii Cabbaasiyiintu ay gacantooda ku burburtay. Xadiiska sheegaya in maalin walba ay Yuug iyo Yamaayuug gidaarka qodaan kaddibna marka ay seexdaan uu haddana sidiisii ku noqdo, waxaa xusid mudan in uu xadiis daciif ah yahay, sidaas darteedna aan loo daliishan karin in gidaarku uu weligiii ilaashanaanayo.

### 6. 6. 4. 2 Culimada Islaamka iyo Magoolka

Sidaas aawadeed baa imaam Daahir ibnu Caashuur, tafsiirkiisa *at-Taxriir wa Tanwiir*, uu qalinku ugu duugay in Magoolkii iyo Tataarkii ay Yuug iyo Yamaayuug ahaayeen, oo waxa uu ku yidhi tafsiirkiisa weyn ee at-Taxriir wa Tanwiir: " Culimada taariikhda iyo kuwa abyaqaanka ahi waxa ay is ku maandhaafeen labada magac ee Magool iyo Tataar in loogu yeedhi karo midba ka kale, sababtuna waa in ay adag tahay in la ka la saaro maaddaama ay is ku dhow yihiin. Culimada qaarna waxa ay yidhaahdeen: Magool waa Maagoog, waana magaca isir hore oo ay lahaayeen oo la odhan jiray Sikiisiyiin (Scythians; السكيثيون)…. Arrinka ay waajibka tahay in la cuskadaana waa in Yuug iyo Yamaayuug ay Magoolkii iyo Tataarkii ahaayeen, Abul-Fidaana waxa uu sheegay Yuug in uu Magoolkii ahaa, markaasna Yamaayuug waxa ay noqonayaan Tataarkii. Kaddibna Tataarkii ayaa ka magacdheeraaday Magoolkii waana ay is ku dhex darsameen, dabadeed labadii qabiilba "Tataar" ayaa ay ku caanbaxeen.

[30] Waxaa soo saaray Bukhaari (3346) iyo Muslim ( 2880).

Markhaatiga ugu muuqda ee arrinkaas [ah in Yuug iyo Yamaayuug ay Magoolkii iyo Tataarkii ahaayeen] waa xadiiska Ummu-Xabiiba ay Saynab bintu Jaxshi ka soo werisay, ee ah in Nebigu uu u soo galay isaga oo argagaxsan oo uu yidhi: "Ilaah xaq lagu caabudaa ma jiro Ilaahay mooyee. Hoog baa Carab u sugnaaday shar ku soo dhowaaday aawadeed, maanta intaa le'eg baa laga furay derbigii Yuug iyo Yamaayuug." La mana garanayo waqtigii ay degaannadooda ka soo ambabaxeen, iyo wixii sababay toona. Waxa se lagu qiyaasayaa in qarnigii lixaad ee Hijriga ay soo ambabaxeen. Boqortooyadiii Carbeedna gacantii Magoolka iyo Tataarka baa ay ku kala daadatay, laga soo bilaabo markii Jinkiis Khaankii Magooliga ahaa uu soo baxay iyo la wareegistii Bukhaara sannadkii 616 H, iyo soo gaadhistoodii Diyaara Bakri sannadkii 628, ilaa ugu dambayn burburintii Hoolaako ee Baqdaad caasimaddii boqortooyadii Carbeed sannadkii 660 H. " [31]

Mar kalena imaamku isaga oo sharxaya aayadda kale ee " حتى إذا فتحت يأجوج ومأجوج" waxa uu yidhi: "Waxa ay mufasiriintu ku tiriyeen [soo bixista Yuug iyo Yamaayuug] astaamaha saacadda ee yaryar, wacdiga soo dhowaanshihiisana waxaa lagu fasiray soo dhowaanshaha qiyaamaha…. iyada oo lagu dhisayo tafsiirkanna, waxa soo baxaysa in aayaddani ay si cajiib ah u sifaysay ka hor soo bixistooda shan qarni, sidaas aawadeed baannu aayaddan ugu tirinnay mucjisooyinka cilmiga ah ee Gaybiga (الغيبي) ah….Baaba'ii boqortooyadii Carbeed iyo burburkii ilbaxnimooda iyo awooddoodiina waxa ay gacantooda ku dhacday Magoolkii iyo Tataarkii waana Yuug iyo Yamaayuug……Soo dhowaanshahanina waa mid nisbi (relative) ah, oo macnihii waxa looga jeedaa marka la barbardhigo inta ka hadhay cimriga adduunyada intii tagtay, sida hadalka Ilaahay ee "إقتربت الساعة وانشق القمر; saacaddii baa soo dhowaatay, dayaxiina wuu kala dhambalmay." [32]

---

[31] Imaam Daahir ibnu Caashuur (At-Taxriir wa Tanwiir, Jus. 17, b. 31)
[32] Imaam Daahir ibnu Caashuur ((At Taxriir wa Tanwiir; Jus. 18, b. 147)

Isagii hortiina, imaam Qurdubi oo noolaa xilligii Magoolku ay dadka xasuuqayeen, ayaa maankiisa ay ku soo dhacday in ay noqon karaan Yug iyo Yamaayuug, waana kii yidhi "Waxa ka soo baxay waqtigan ummado Ilaahay mooyee cid kale koobi karin, muslimiintana Ilaahay mooyee cid kale ka difaaci karin, ilaa heer aad mooddaba in ay Yuug iyo Yamaayuug yihiin ama hordhacoodii". [33]

Dhanka kale, imaamkii weynaa ee Maxamed Anwar al-Kishmiiri, kitaabkiisa Faydul-Baarii fii Sharxi Saxiixil-Bukhaari, ayaa kaddib markii uu si fiican uga soo warramay derbiga Dulqarnayn oo uu xoojiyay in uu kan Daaryaal yahay oo aanu ahayn derbiga weyn ee Shiinaha iyo ku kale toona, sheegay in uu maanta burbursan yahay derbigu, Qur'aankana aanu ku sugnayn ballanqaad ah in uu weligii dhisnaan doono.[34] Mawlaanaa Abulkalaam Aazaad laftiisa oo cilmibaadhistan abaalkeeda leh baa isna sidaa si le'eg ku tegay, waxaana soo bixistoodii uu u qaybiyay toddoba marxaladood oo tii ugu dambaysay ay tii Magoolka ahayd.

Dhanka kale, sida juquraafiyaqaankii Idriisi [35] uu ku sheegay buuggiisa Nus'haha, Ibnu-Khardadbana Masaaligga, [36] boqorkii Cabbaasiga ahaa ee Haaruun al-Waasiq Billaah ayaa xilligiisii manaanm ama riyo ku arkay in teedkii Dulqarnayn ee Yuug iyo Yamaayuug hayay uu jabay. Taasina waxa ay ku abuurtay cabsi iyo argagax badan, kaddibna waxa uu diray 60 nin oo uu u horreeyo Salaam at-Turjumaan oo


[33] Abuu-Cabdullaah Muxammed ibnu Cabdillaahi al-Qurdubi (Tafsiirul-Qurdubi, Jus. 10, b. 426)

[34] Muxammed Anwar al-Kishmiiri (Faydul Baari fii Sharxi Saxiixil-Bukhaari, Jus. 4, b. 23)

[35] Muxammed al-Idriisi (1100- 1165 M), waa juquraafiyahan muslin ah oo reer Andalus ah, waxaana lagu tiriyaa juuquraafgiyahankii ugu weynaa ee taariikhda soo maray, khariidadihiisii iyo jaantusyadiisiina waxa ay ahaayeen isha koowaad ee xilligii hanaqaadkii Yurub loo noqon jiray.

[36] Abul-Qaasim Cubaydullaah ibnu Cabdallah Ibnu-Khardadbah (Al-Masaalik wal Mamaalik, b. 163)

afyaqaan luuqado badan yaqaanna ahaa, si uu u soo sahamiyo teedka ugana warkeeno. Salaam at-Turjumaan waxa uu u jihaystay jihada waqooyi oo ahayd meesha qabiilooyinkan Banka Uraasiya degganaa ay ku noolaayeen, safar dheer oo qaatay 28 bilood kaddibna waa uu soo noqday, isaga oo tilmaamo qotodheer ka bixiyay teed uu sheegay in uu kii Dulqarnayn yahay, waana suurtogal in uu soo arkay teedkii Daaryaal marka la fiiriyo sifooyinka uu ka bixiyay ee sawirkan hoose ka muuqata. Manaamkaasna taariikhda ayaa rumaysay, oo saddex ama afar qarni oo keli ah kadibba waa tii Magoolka oo Yuug iyo Yamaayuug ahaa wixii ay sameeyeen sameeyay, boqortooyaddii Cabbaasiyadana dhulka la simay, arladana fasahaadiyay.




Siduu Salaam at-Turjumaan uu u tilmaamay teedka Yuug iyo Yamaayuug

# 7. Gebagebo

Akhriste, marka aynnu qabsanno ra'yigan ah in Yuug iyo Yamaayuug ahaayeen Magoolkii soona baxeen, sida culimadaas iyo kuwo kale oo aynaan carrabbaabinba ay ku tageen, iyo in soo bixitaan dambe aanu u hadhin, in kasta oo aanay ku rumoobin sifada xadiiskii Muslin soo saaray ee Nawaas ibnu Samcaan laga weriyay ee sheegayay in Yuug iyo Yamaayuug ay cabbi doonaan badyarada Dabariya, lagana fahmayay in Nebi Ciise ay ka dambaynayaan, oo waxyaabahaasi aanay dhicin xilligii Magoolka iyo Tataarka, haddana kaasi waa ra'yiga ugu awoodda badan uguna xooggan, ee aayadaha Qur'aanka iyo xadiiska Nebiga ee Muslin iyo Bukhaariba ay keligii ku soo saareen baabka Ya'juuj wa Ma'juuj ee aynnu soo sheegnay iyo taariikhdaba la jaanqaadaya, aniguna aan xoojinayo.

Culimada iyo cilmibaadhayaasha qaarna waxa ay qabaan, in Yuug Yamaayuug ay soo baxeen, balse mar kale oo dambe ay u hadhsan tahay oo ay fasahaadin doonaan caalamka, waxaana suurtogal ah marka lagu socdo ra'yigan in badyarada Dabariya ay xilligaas badideedu uumibaxdo oo inta soo hadhay ay cabbi doonaan, amaba badnidooda lagu cabbirayay ee aan looga jeedin si toos ah bay biyaha u cabbi doonaan, ama faragelinta DNA-da ee socota ay ka heli doonaan awoodda ah in ay badyaro dhan cabbi karaan iyaga oo ah aadame dadka la mid ah. Sidoo kalena, waxa culimadani ay intaas ku dareen in derbiga burburkiisa iyo fasahaadkoodu aanu is ku xidhnayn, oo iyada oo derbigu uu burbursan yahay haddana fasahaadkoodii u weynaa uu hadhsan yahay. Ilaahay baana xaqiiqada nooga ogaal badan.

# Dhammaad